

Dib-u-dhiska saraha dhaadheer

Wararkii u dambeeyay ee raritaanka

Dib-u-dejinta loo sameeyay oo lagu magacaabo Darko ayaa ka hadlaya guuritaankii uu ka guuray dabaqyada dhaadheer ee ku yaal Richmond.

Juun 2026

Macluumaad loogu talagalay dadka deggan

- 94 Ormond Street, Kensington
- 159 Melrose Street, Waqooyiga Melbourne
- 29 Crown Street, Flemington



Xusuusin ku saabsan ballamihii aan qaadnay:

1. Xuquuqda aad leedahay iyo kiradaada sida loo go'aaminayo waxba iskama badali doonaan, iyadoona la qirayo inaad sidoo kale xaq u yeelan karto Gargaarka Kirada ee Dawlada Dhexe (Commonwealth Rent Assistance)
2. Kiradaada waxaa loo go'aamin doonaa sida ay hada tahay ilaa inta aad rabto inaad ka sii deganaato guriga cusub
3. Waxaad dooran kartaa inaad sii deganaato gurigaaga cusub
4. Waxa kale oo aad haysataa ikhtiyaar ah inaad dib ugu laabato xaafada aad hada degan tahay marka la dhameystiro howlaha dib-u-dhiska

Ka hel xog dheeraad ah bogga 10aad

In wax laga ogaado safarka guuritaanka ee ay dadka meesha degan gelayaan

Bishii Janaayo ee sanadkan, waxaan u sheegnay dadka deegaanka inaan dayactir ku sameyn doono dabaqyadii duqoobay ee ku yaalay xaafadaha Flemington, Kensington iyo Waq Melbourne. Dadka hada guryahaas degan iyo kuwa mustaqbalka soo degi doonaba waxaan u dhisaynaa guryo ka wanaagsan, ka amni fiican kana qurux badan kuwii hore.

Wali waxaa lagu jiraa maalmihii hore, laakiin waxaan sii wadi doonaa inaan idinla wadaagno macluumaadka ku saabsan howlaha guuritaanka, guryaha cusub iyo caawimaadda la heli karo inta ay howlahan socdaan.

Muuqaalka ka muuqda bogga hore: Mid ka mid ah dadka guryaha degan oo lagu magacaabo Darko isla markaasna dib-udejin loo sameeyay ayaa ka hadlaya guuritaankii uu kasoo guuray dabaq ku yaal Richmond.

Waan idin dhegeysanay si aan ugu diyaargarowno inaan idin caawino

Bishii Febraayo, waxaan xog ka soo ururinay dadka deegaanka ee dib-u-dejinta loo sameynayo si ay nooga caawiyaan qorsheynta aan doonayno inaan xilli hore sii sameyno iyo sidii aan ku xaqiijin lahayn in taageerada saxda ah la heli karo. In ka badan 300 oo qof oo guryaha degan ayaa ka qeybqaatay xog-ururintaas macluumaadkii aan ku helnay waxayna la micno tahay inaan hadda diyaar u nahay inaan ku caawinno.

Waxaan maqalnay in dad badan oo guryaha degan ay dareensan yihiin inay ku faraxsan yihiin guuritaanka.



Markii aan qiimaynay wixii aan maqalnay waxaan:

- dabaq kasta u samaynay Guddiyada Xiriirinta Bulshada si ay dadka deegaanku u soo bandhigaan wixii ay ka walaacsan yihiin, ama ay su'aalo noo soo weydiyaan iyo sidoo kale inay bulshadooda ula wadaagaan macluumaadka
- qalab la daabacay oo la diyaariyey oo leh macluumaad dheeraad ah oo qoran kuna saabsan howlaha guuritaanka, waqtiyada ay wax kasta dhacayaan iyo guryaha cusub ee goobta ka ag dhow, oo ay ku jiraan muuqaalo iyo naqshadaha guriga
- waxaan la shaqeynay adeegyada caafimaadka si aan u hubinno inay diyaar u yihiin inay ka caawiyaan dadka goobta deggan sidii ay ugu xiri lahaayeen adeegyada caafimaadka ee muhiimka ah, baahiyaha la xiriira gelitaanka iyo u diyaargarowga guuritaanka.



In ka badan **70% ayaa dareemaysa inay diyaar u yihiin inay u guuraan guryo cusub** laga bilaabo bisha Luulyo 2026




In ka badan **80% ayaa ku faraxsan inay ku noolaadaan dhismayaal casri ah**



Guryo cusub oo ku yaal Holland Court, Flemington ayaa la dhammeys tiri doonaa dabayaaqada 2026.

Waxaa loo nashqadeeyay sidii ay u taageeri lahaayeen bulsho ammaan ah oo si wanaagsan isugu xiran, waxaa ka agdhow dukaamo iyo adeegyo kale iyadoo gaadiidka dadweynahana uu albaabkooda ka ag dhow yahay.

Waxaa jiri doona qol bulsho oo siyaabo kala duwan loo isticmaali karo, meelo la wadaago iyo meelo kale oo loo isticmaali karo makhaayad ama adeegyo kale. Waxaa dhamaan ku hareeraysan barxado cusub iyo kuwo hore u jiray sidoo kalena meel laga maamulo guryaha bulshada ayaa goobta ku ooli doona.



Guryaha cusub waxay lahaan doonaan waxyaabo aysan sarihii hore ee dhaadheeraa aynan lahayn sida baalkano iyo qolal dharka lagu dhaqdo oo u gaar ah, jikooyin casri ah iyo khaanado waaweyn.

Albaabo iyo marino ballaaran, fadhi iyo jikooyin isku furan, iyo qubeysyo istaag ah oo u sahlaya dadka uu socodku dhibayo inay si sahlan dhaqdhaqaaq ugu dhex sameeyaan.

Waxay noqon doonaan kuwo si fudud loo kululayn karo loona qaboojin karo sanadka oo dhan lehna daaqado adag, iftiin fiican oo dabiici ah, hawo-mareen iyo dahaar waxqabad sare leh.

Amniga waxaa lagu sii xoojiyay meel laga wici karo guri kasta (intercoms) si loo xakameeyo dadka gelaya dhismaha.

Dukaamo, adeegyo iyo meelaha gaadiidka laga raaco ayaa ku dhow

Mt Alexander Rd

markaad aadeysa

Essendon ←



Debneys Park

Djerring Hub



Barxad cusub oo cabirkeedu yahay 5000 mitir oo laba jibbaaran ayaa la furayaa sanadka 2026 dhexdiisa



600 oo mitir ayay u jirtaa:

- Dukaan weyn (supermarket)
- Farmashiistaha



Saldhigga/xarunta Newmarket



Boostada wax yar ayaa loo soconaya ama taram ka ayaa dhaqsi ku geynaya



Rug caafimaad ayaa u dhow

Holland Court

Victoria St

markaad aadeysa
Maribyrnong/Highpoint ←



→ markaad aadeyso magaalada

Jidka Nambarka Taraamka 59
ee mara Mt Alexander Road

Maxadada Buundada
Flemington

Rugta caafimaadka
iyo adeegyada
taageerada naafada
waa kuu dhow yihiin



CityLink



Racecourse Rd

→ markaad aadeyso magaalada

Jidka No. 57 taraamka ee
mara Racecourse Road



Wax yar ayuu tramku u soconayaa
Isbitaalka Royal Melbourne

Dadka deggan Richmond ee guuray sannadkii hore ayaa ku faraxsan inay nala wadaagaan wixii kala kulmeen.

"Si cajiib leh ayaa wax walba loo qorsheeyay. Aad bay u sahlanayd. Wax dhibaato ah, ama werwer ah kalama kulmin. Waxaan amaanayaa kooxda dib-u-dejinta."

"Waxay noo diyaariyeen dadkii na rarayay taariikh aan ku qanacsanaa. Maalmihii aan codsaday ayay wax kasta ila qabteen."

"Waxay i siiyeen sanduukhyo, bacaha lagu duubo alaabaha jabi kara, koolooyin sidoo kalena waxay ii oggolaadeen inaan alaabo aanan u baahneyn kaga tago gurigii aan hore u deganaa. Wax kharash ah igama bixin."

Darko



"Maaha wax saas u adag. Kooxda u qaabilsan howlaha dib-u-dejinta ayaa iga caawiyay wax walba. Aniga uma baahnayn in aan wax walba qabto. Wax kharash ah igama bixin."

Tony

"Aad ayaan ugu faraxsanahay guriga cusub. Wuxuu ku haboon yahay dadka waayeelka ah, oo uu sahlan yahay gelitaanku. Qolka qubeyska wuxuu leeyahay biro la qabsan karo waana balaaran yahay. Waxaan leenahay dibad bax weyn oo aan ka helno iftiin badan, sidoo kalena waxaan ku waran karaa dharka."

Xiu



Cohealth ayaa halkan kuugu diyaar ah si ay kuu caawiyaan

Cohealth waxay la shaqeyn doonaan kooxda u qaabilsan howlaha dib-u-dejinta si ay u taageeraan dadka deegaanka ee u baahan in laga caawiyo guuritaanka.

Maxay cohealth iga caawin kartaa?

- Inay kugu xiraan adeegyada caafimaadka
- Inay kaa caawiyaan sidii gurigaaga loogu samayn lahaa wixii aad u baahan tahay ee khuseeya badbaadada
- Inay kuu diyaariyaan sidii gurigaaga cusub loogu rakibi lahaa waxyaabaha kaa caawinaya dhaqdhaqaaqa
- Inay ku siiyaan talooyin iyo taageero la xiriirta sidii aad ku heli lahayd alaabta guriga la dhigto ee aad u baahan tahay
- Caawimaad adiga kuu khaas ah oo la xiriirta in alaabaha lagu furfuro dibna laguugu xirxiro
- Inay kaa caawiyaan sidii aad u fahmi lahayd MyAgedCare, NDIS ama adeegyada raadinta daryeelka

Cohealth waxay sannado badan oo waayo-aragnimo ah u leeyihiin la shaqeynta bulshada ku nool Flemington, Kensington iyo North Melbourne.

Waxay halkan u joogaan inay ku siiyaan taageero dheeraad ah si ay kaaga caawiyaan guuritaanka oo ay ku jiraan: baahiyaha caafimaadka iyo helitaanka, caawimaad si aad ula xiriirto adeegyada caafimaadka iyo bulshada ee ka ag dhow gurigaaga cusub, iyo inay xaqiijiyaan in gurigaaga cusub loo sameeyo wax kasta ee uu u baahan yahay in loo sameeyo sida bir la qabsado ama wixii kaloo ku caawin kara.

Maamulayaasha kiiska waxay sidoo kale kuu samayn karaan inay kuu gudbiyaan dhakhaatiirta, dhakhaatiirta ilkaha, dhakhaatiirta jimicsiga iyo dhakhaatiirta lugaha, waxayna kaa caawin karaan in lagula buuxiyo arjiga aad ku codsanayso caawinta daryeelka MyAgedCare ama NDIS iyo caawimaad laga heli karo kalkaalisoonka bulshada ee guriga kugu soo booqan karo.

Waxaa lagu amaanaa inay caawiyaan dadka deegaanka sidii ay ugu noolaan lahaayeen nolol wanaagsan, oo farxad iyo deganaan ay ku dareemayaan guryahooda cusub. La xiriir iyaga si aad ula yeelato wadahal qarsoodi ah oo ku saabsan sida ay kuu caawin karaan.

cohealth
care for all

Cohealth waxay diyaar u yihiin inay caawiyaan:

Isniinta ilaa Jimcaha

9-ka subaxnimo ilaa 5-ta galabnimo

📞 0460 929 176

✉ relocationsupport@cohealth.org.au

Sally Plunkett, Kalkaalisada u sarreysa daryeelka caafimaadka bulshada ee cohealth.



Caawimo iyo xasuusin wax ku ool ah

Marka la gaaro waqtigii loo guuri lahaa:

- ✓ Waxaan bixin doonnaa kharashka ku baxaya guuritaankaaga
- ✓ Waxaan kuu balamin doonnaa dad alaabaha kuu rara
- ✓ Waxaan ku siin doonnaa baakado iyo alaabaha wax lagu rarto
- ✓ Waxaan kaa caawin doonnaa inaad xirxirto hadhoowna aad kala furfurto haddii loo baahdo
- ✓ Waxaan hubin doonnaa inaad ku xirnaato adeegyada caafimaadka iyo taageerada


Waxyaabaha wanaagsan ee loo baahan yahay inaad ogaato:

1. Xuquuqda aad leedahay iyo kiradaada sida loo go'aaminayo waxba iskama badali doonaan, iyadoona la qirayo inaad sidoo kale xaq u yeelan karto Gargaarka Kirada ee Dawlada Dhexe (Commonwealth Rent Assistance)
2. Kiradaada waxaa loo go'aamin doonnaa sida ay hada tahay ilaa inta aad rabto inaad ka sii deganaato guriga cusub
3. Waxaad dooran kartaa inaad sii deganaato gurigaaga cusub
4. Waxa kale oo aad haysataa ikhtiyaar ah inaad dib ugu laabato xaafada aad hada degan tahay marka la dhameystiro howlaha dib-u-dhiska



Maxaa xiga oo dhici doona?

Halkaan waxaa meesha hadda wax noo marayaan iyo waxyaabaha aad filan karto mustaqbalka.




Cidda aad la hadli karto


Homes Victoria

Homes Victoria waa qayb ka mid ah Waaxda Qoysaska, Cadaaladda iyo Guryeynta. Waxaan maamulnaa guryaha dadweynaha ee Victoria.

Waxaan sidoo kale maamulnaa dib-u-dhiska dabaqyadii hore ee duqoobay.


Haddii aadan hubin cidda aad la xiriiri lahayd, nala soo xiriir annaguna waxaan kugu xidhaynaa qofka saxda ah.

 1800 716 866

 enquiries@homes.vic.gov.au

Kooxdaada U-qaabilsan Howlaha Dib-u-dejinta

La hadal howlwadeenkaaga u qaabilsan howlaha dib-u-dejinta haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan dib-u-dejintaada, ama aad rabto inaad soo gudbiso ama aad wax ka badesho arjigaaga dib-u-dejinta, ama aad rabto inaad wax ka ogaato guryaha la heli karo.

 relocationsteam@homes.vic.gov.au



Iskaan garee si aad ugu akhrido dukumintigan luqaddaada



Taageerada caafimaadka iyo badqabka

Hay'adaha caafimaadka ee nala shaqeeya waxay ku siin karaan macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida baahiyahaaga caafimaad loo taageeri doono inta ay socdaan howlaha dib-u-dejintu.

Cohealth


 0460 929 176

 cohealth.org.au


Taageerada ah xuquuqda ay leeyihiin dadka guryaha degan


Kirada Victoria – macluumaadka kirada iyo sharciga

 1800 068 860

 www.tenantsvic.org.au

Ururka Kiraystayaasha Dadweynaha Victoria (Victorian Public Tenants Association) – u doodis iyo taageero

 1800 015 510

 www.vpta.org.au

Xarumaha sharciga bulshada – caawimaad sharci oo lacag la'aan ah, waxkastana ay sir kuu yihiin

Ka hel xarunta sharciga bulshada ee deegaanka www.fclc.org.au/find_a_community_legal_centre